

2024 Working Families Tax Credit Application (Tilmaamaha Buuxinta Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya 2024)

Yaa u qalma?

Si aad ugu qalanto Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya (Working Families Tax Credit, WFTC), waa inaad buuxisaa dhamaan shuruudaha 2024:

- Adiga (ama xaaskaaga hadii ay ku munaasaban tahay) waxaad xaraynaysaa cashuurta celinta federala (form 1040 [foomka 1040] ama 1040-SR).
- Adiga (ama xaaskaaga hadii ay ku munaasab tahay) waxaad u qalantaa shuruudaha Daynta Cashuurta Dakhliga La Heley (Earned Income Tax Credit, EITC) ee federala, **AMA** waxaad buuxin kartaa shuruudaha EITC, laakiin waxaad xarayn kartaa Lambarka Aqoonsiga Cashuur Celinta Shakhsi Ahaaneed (Individual Taxpayer Identification Number, ITIN).
- Adiga (ama xaaskaaga hadii ay ku munaasab tahay) waa inaad noqotaan ugu yaraan 25 oo aad ka yaaraataan 65 jir **AMA** aad haysataa ilme u qalma.
- Waa inaad degan tahay Washington ugu yaraan 183 maalmood (wax ka badan kala badh sanadka).
- Adiga (iyo xaaskaaga hadii ay ku munaasab tahay) waa inaad buuxisaan barnaamijka Dakhliga Wadarta Habaynta (Adjusted Gross Income, AGI) oo ka hooseeya waxa ku qoran shaxda.

Dakhliga Wadarta Habaynta (AGI) waa inuu noqdaa ugu yaraan		Tirada Caruurta u Qalanta
Xaalada Xaraynta: Kali	Xaalada Xaraynta: Guursaday	
\$18,591	\$25,511	0
\$49,084	\$56,004	1
\$55,768	\$62,688	2
\$59,899	\$66,819	3+

Maxaan u baahanahay?

Fadlan xaqiiji inaad haysato macluumaadka soo socda kahor inta aanad xaraynin arjiga:

1. **Nuqulka cashuur celintaada federala 2024 oo buuxa**, waxaa kamid ah foomkaaga 1040 ama 1040-SR iyo dhamaan foomamkaaga iyo jadwalka aad xaraysay cashuur celintaada dakhliga federala ee 2024.
 - a. Arjigaaga, waa in aad ku sheegtaa mushaharkaaga, iyo wixii bakhshiish ah ee aad ka hesho laynka 1z iyo habaynta wadarta dakhliga (AGI) ee laynka 11.

2024 Working Families Tax Credit Application (Tilmaamaha Buuxinta Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya 2024)

2. **Magaca sharciga, lambarka sooshaal sekuuritiga (social security number, SSN) ama lambarka aqoonsiga cashuur bixiyaha shakhsi ahaaneed (ITIN), iyo taariikhda dhalashada** ee adiga, xaaskaaga (hadii ay ku haboon tahay), ee wixii caruur ah ee u qalma. Hadii aad dalbatay ITIN oo aanad weli helin, sax sanduuqa Su'aasha 2 ee sheegaya "waxa aan ka sugayaa wakhtigan ITIN Adeega Dakhliga Gudaha (Internal Revenue Service, IRS) (kayga, ka xaaskayga, iyo/ama ilmahayga)." Arjiyada lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya lagama shaqayn karo ilaa inta aad uga direyso Waaxdu nuqul kamid ah CP565 kaaga si aad u tusto in ITIN kaaga shaqaynaya in la bixiyey.
3. Cinwaanka boosta wakhtigan iyo cinwaanka meesha uu qofku degan yahay. Hadii aad isticmaasho Sanduuqa boostada ama boos gaarka ah, waa inaad u sheegtaa Waaxda cinwaanka aad wakhtigan degan tahay. Ka eeg qaybta "Deganaanshaha" wixii faahfaahin ah ee ku saabsan waxa aad samaynayso hadii aanad lahayn cinwaan aad degan tahay.
4. **Lambarkaaga bankiga iyo lambarka xisaabta** hadii aad doorato inaad si toos ah ugu shubto.
5. **Saxeexa Dalbadaha** (iyo ama xaaskaaga hadii ay ku munaasab tahay).

Goorma ayaan dalbanayaa?

Laga bilaabo Febraayo 1, 2025, wixii 2024.

Sida loo dalbado?

- Onlayn ahaan WFTC.wa.gov
- Arjiyada Waraaqaha ah waxaa laga heleyaa:
 - Websaytkeena: WFTC.wa.gov
 - Xafiiska deegaanka ee DOR (Department of Revenue, Waaxda Dakhliyada):
 - Bellingham - 1904 Humboldt Street
 - Bothell - 12100 NE 195th St Suite 100
 - Kent - 20819 72nd Ave South Suite 680
 - Port Angeles - 734 E First St Suite B
 - Richland - 1657 Fowler Street
 - Seattle - 2101 4th Ave Suite 1400
 - Spokane - 1330 N Washington Suite 5600
 - Tacoma - 3315 S 23rd St Suite 300

2024 Working Families Tax Credit Application (Tilmaamaha Buuxinta Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya 2024)

- Tumwater - 6500 Linderson Way SW
 - Vancouver - 8008 NE 4th Plain Blvd Suite 320
 - Wenatchee - 630 N Chelan Ave Suite B3
 - Yakima - 3703 River Rd Suite 3
- Arjiyada waraaqaha ah ayaa la keeni karaa xafiiska aaga ama boosta loogu diraa:
Washington State Department of Revenue
Attn: Working Families Tax Credit Division
PO Box 47481
Olympia, WA 98504-7481

A. Macluumaadkaaga

1. Sheeg magacaaga sharciga ah oo sadexan. Magacaaga kowaad iyo magaca awowgaa ama magaca qoysku waxa uu usoo bixi doonaa sida uu ugu qoran yahay kaadhkaaga sooshaal sekuuritiga ama waraaqahaaga ITIN.
2. Sheeg "SSN" (Lambarka Sooshaal Sekuuritiga) buuxa oo sax ah, ama "ITIN" (Lambarka Aqoonsiga Cashuurta Shakhsi Ahaaneed) sax ah oo ku qor meesha banaan.
 - Hadii aad wakhtigan ka sugayso ITIN IRS oo aanad weli helin, waxa aad buuxin kartaa arjiga. Hadii ay sidaa tahay, sax sanduuqa arjiga ee odhanaya "waxa aan wakhtigan ka sugayaa ITIN IRS (kaydii, ka xaaskayga, iyo/ama ka ilmahayga)". Arjiyada lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya lagama shaqayn karo ilaa inta aad uga direyso Waaxdu nuqul kamid ah CP565 kaaga si aad u tusto in ITIN kaaga shaqaynaya in la bixiyey.
3. Ku qor taariikhda dhalashada oo ah qaabka (MM/DD/YYYY). Tusaale ahaan, hadii taariikhda aad dhalatay ay tahay Abriil 15, 1980, waa inaad gelisaa 04/15/1980.
4. Hadii aad leedahay liisanka gaadhiga gobolka Washington ama aqoonsi, waxa aad ku qortaa liisanka gaadiidka gobolka Washington ama lambarka Aqoonsiga Gobolka oo ku qor sanduuqa banaan.
 - Waxa aad weli u qalmi kartaa adiga oo aan haysan liisanka gaadhiga gobolka Washington ama Aqoonsiga Gobolka. Inaad na siiso macluumaadkan waxa uu naga caawinayaa in aanu dedejino nidaamka naqdinta arjiga. Hadii aanad haysan liisanka gaadiidka gobolka Washington ama aqoonsiga, ama aanad sida kale u awoodin inaad keento, sax sanduuqa odhanaya, "Ma haysto ama ma doonayo in aan bixiyo lambarka liisanka ama aqoonsiga gobolka Washington."
5. Ku qor cinwaankaaga boosta wakhtigan.

2024 Working Families Tax Credit Application (Tilmaamaha Buuxinta Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya 2024)

- Cinwaankan boosta waxaa loo isticmaali doonaa dhamaan macluumaadka la is waydaarsanayo iyo in lagu soo diro jeegaga lacagta ama kaadhkaaga lacagta lagu shubay. Hadii cinwaanka boostu uu is bedelo, waxaa muhiim ah inaad markaba geliso. Waxaad cusboonaysiin kartaa adiga oo kala hadlaya Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya 360-763-7300.
- Hadii aad ogolaatay in aad hesho waraaqaha boosta oo laguugu soo diro hay'ada ama saaxiib ama cid qaraabo ah cinwaankeeda, fadlan waxa aad ku dartaa boosta cida ka **masuulka ah** cinwaanka aad bixisay. "Cida iska leh" waxay ka dhigan tahay "laga heley" ama "sida loogu dirayo". Sidoo kale waxaa loogu qoraa "C/O" shayga la dirayo. Ku daristan waxey muujinaysaa sida bushqadan loogu gaynayo cida ka masuulka ah (hay'ada, saaxiib ama qaraabo), kaas oo kadibna u gayn doona cida ay ku socotay (adiga). Hadii cinwaanka boosta aanu ahayn meesha aad degan tahay, adeega boostu ma gayn doono shayga iyada oo aad ku sheegto moojee cida ka masuulka ah qaybta cinwaanka.

Tusaale ahaan, cinwaanka waxa uu warqada ugu yaalaan sidan.

[Magacaaga]

C/O [Hay'ada ama magacasaaxibkaagaama qaraabada magaceeda]

123 APPLE WAY

CAASIMADA ST 99999-9999

6. Sheeg lambarka(rada) taleefanka iyo cinwaankaaga iimeelka.

B. Su'aalaha deganaanshaha

7. Hadii aad degan tahay Washington ugu yaraan 183 maalmood (wax ka badan kala badh sanadka) 2024, sax sanduuqa "Haa". Hadii aanad deganayn Washington ugu yaraan 183 maalmood, sax sanduuqa "Maya". Hadii aad saxdo "Maya," **ku jooji halkaas**. Uma qalantid lacag soo celinta.

Oggow: Hadii aad xaas leedahay oo aad wada jir u xaraynaynsaan, kaliya hal ruux ayaa looga baahan yahay inuu buuxiyo shuruudaha 183 maalmood ee deganaanshaha. Shakhsiga buuxiya shuruudaha deganaanshaha waa inuu noqdaa qofka kowaad ee dalbadanaya. Qofka degan meel ka baxsan gobolku ma noqon karo qofka kowaad ee dalbanaya.

8. Hadii cinwaanka boostu ay lamid tahay ka wakhtigan ku qoran cinwaanka qofka degan, sax sanduuqa "Haa". Hadii cinwaanka boostu ayna lamid ahayn ka

2024 Working Families Tax Credit Application (Tilmaamaha Buuxinta Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya 2024)

wakhtigan ku qoran cinwaanka qofka degan, sax sanduuqa "Maya". Hadii aad ku jawaabto "Haa," waxa aad u gudbi kartaa Qaybta C.

9. Hadii aad ku jawaabto "Maya" su'aasha 8, waxa aad ku sheegtaa cinwaankaaga deganaanshaha wakhtigan meesha banaan. Hadii lagu siiyo P O Box ama boosta gaarka ah sida ku qoran cinwaankaaga boosta, waa inaad saxdaa "Maya" su'aasha 8 oo aad sheegtaa cinwaankaaga kowaad meesha banaan.
- Hadii aad bilaa guri tahay ama aanad sida kale u awoodin inaad u sheegto cinwaankaaga kowaad, sax "Maya" su'aasha 8 oo waxa aad saxdaa sanduuqa sheegaya, "Ma garanayo ama ma doonayo inaad sheego cinwaanka kowaad ee aan deganahay." Fadlan oggow in Waaxda ay kula soo xidhiidhi karto si ay u xaqiijiso inaad buuxisay shuruudaha deganaanshaha. Hadii aad saxdo "Maya" su'aasha 8, waa inaad sheegtaa cinwaanka kowaad, ama sax inaad iska daysay bixinta cinwaanka deganaanshaha kowaad ee arjigaaga si aad u buuxiso.

C. Su'aalaha u qalanka

10. Sax sanduuqa lamidka ah xaalada buuxinta ee isticmaashay si aad ugu xarayso cashuur celintaada dakhliga federalka 2024.
11. Hadii aad dalbatay daynta EITC ee federalka ee 2024, sax sanduuqa 'Haa' oo toos u aad su'aasha 13. Hadii aanad dalban daynta, sax sanduuqa 'Maya' oo sii aad oogu aado su'aasha 12.
- Hadii aad dalbato EITC, waa inay jirto xadi dayn ah oo ku qoran laynka 27 ee 1040 kaaga. Hadii aad dalbato EITC oo aad leedahay caruur u qalantaa, waa inaad sidoo kale xaraysaa Schedule EIC (Jadwal EIC [Dheefta dakhliga la kasbaday, Earned Income Credit]).
12. Miyaad buuxisay DHAMAAN shuruudaha soo socda? Hadii aad xaraysay, sax sanduuqa 'Haa' oo sii wad su'aasha 13. Hadii aanad buuxin shuruudaha soo socda, sax sanduuqa "Maya". Hadii aad saxdo "Maya," **ku jooji halkaas**. Uma qalantid lacag soo celinta.

Hadii aanad garanaynin hadii aad u qalanto, waxa aad ka eegtaa shuruudaha hoos:

- Wadarta Dakhligaaga La Habeeyay (AGI) ee khadka 11 ee cashuur celintaada federalka 2024 waa inay ka yaraato:
 - \$18,591 (\$25,511 cidii xaas ku wada xaraysanaya) hadii aanad lahayn ilme u qalma,
 - \$49,084 (\$56,004 cidii xaas ku wada xaraysanaya) hadii aad leedahay hal ilme oo u qalma,

2024 Working Families Tax Credit Application (Tilmaamaha Buuxinta Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya 2024)

- \$55,768 (\$62,688 cidii xaas ku wada xaraysanaya) hadii aad leedahay laba caruur ah oo u qalanta, ama
- \$59,899 (\$66,819 cidii xaas ku wada xaraysanaya) hadii aad leedahay sadex ama wax ka badan oo caruur ah oo u qalanta.
- Hadii adiga (ama xaaskaaga hadii ay ku munaasab tahay) aynaad lahayn caruur u qalanta, adiga (ama xaaskaaga hadii ay ku munaasab tahay) waa inay noqdaan 25 - 64 jir dhamaadka 2024.
- Hadii adiga (ama xaaskaaga hadii ay ku munaasab tahay) aad leedihiin dakhli maalgelin, waa inay ka yaraataa \$11,600.
- Xaaladaha soo socda KUMA khuseeyaan 2024.
 - Waxa aad xaraysay Federal Form 2555 (Foomka Federaalka ee 2555), ee la xidhiidha dakhliga laga heley dibada.
 - Adiga (ama xaaskaaga hadii ay ku haboon tahay) waxa aad dalbateen ilmaha u qalma ee qofka kale.
 - Hadii aad ka qabto su'aalo u qalanka caruurtaada, adiga (ama xaaskaaga hadii ay ku munaasab tahay) waxa aad dalbateen ku dul saar ahaan qofka kale.
 - Adiga (ama xaaskaaga hadii ay ku munaasab tahay) waxaa loola dhaqmay cid gacan saar la leh cid aan Maraykanka deganayn.
 - Waxa aad wakhti xaadirkan ku jirtaa mudo aan lagu ogolayn dalabkaaga Daynta Dakhliga La Heley ee Federaalka (EITC).

D. Macluumaadka Xaaska

Hadii aanad lahayn xaas ama lamaane aad wada degan tihiin, ku bood qaybta E.

13. Waxa aad sheegtaa magaca xaaskaaga/lamaanahaaga aad wada degan tihiin.
Magaca kowaad iyo magaca awowga ama magaca qoyska waa in loo qoraa qaabka uu ugu qoran yahay kaadhka sooshaal sekuuritiga ama waraaqaha ITIN.
14. Sheeg sanduuqa "SSN" (Lambarka Sooshaal Sekuuritiga) ee xaaskaaga/lamanaaha aad wada degan tihiin, ama "ITIN" (Lambarka Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha Shakhsiga ah) sax ah oo ku qor meesha banaan.
15. Waxa aad sheegtaa taariikhda dhalashada xaaskaaga/lamaanaha aad wada degan tihiin oo ah qaabka (MM/DD/YYYY). Tusaale ahaan, hadii taariikhdiisa dhalashadu yahay Abriil 15, 1980, waa inaad u qortaa 04/15/1980.

2024 Working Families Tax Credit Application (Tilmaamaha Buuxinta Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya 2024)

E. Macluumaadka caruurta u qalanta

Qaybtan waxa weeye kaliya arjiyada ee u qalma caruurta lacag soo celinta. Waa inaad bixisaa dhamaan macluumaadka hoos looga baahan yahay ilmahaaga (caruurtaada) u qalma. Hadii aad bixin waydo macluumaadka waxay keeni kartaa dib u dhac nidaamka arjiga. **Ilmaha u qalma waxaa kaliya lagu dalban karaa hal arji oo uu ay gudbiyaan shakhsi ama lamaane.**

Yaa loo yaqaan ilmaha u qalma?

Caruurta u qalanta waa inuu buuxiyaa shuruudaha u qalanta ee la dalbanayo ee arjigaaga. Ilmahaagu waa inuu adiga dhiig kula wadaagaa, yahay da' gaar ah, oo aynu iskii u xaraynaynin, oo uu kula daganaa wax ka badan kalabadh 2024.

Ilmaha u qalma iyo dalabka cida laga masuul yahay ee cashuurta federalka lama mid aha wixii ah ujeedada Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya. Hadii aad dalban kari waydo shakhsiga cida laga masuulka yahay ee cashuurtaada federalka, kama dhigna inaad dalban karto ilmaha u qalma. Fadlan xaqiiji ilmo kasta oo aad u dalbanayso Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya inuu u qalmo shuruudaha u qalanka ee ku qoran hoos.

Xidhiidhka

Ilmaha u qalma waa inuu adiga si uun kaaga dhaxeeyaa xidhiidh. Waa inuu noqdo ilmahaaga ama waa inaad walaalo tihiin. Tusaale ahaan, ilmaha u qalma waxa uu noqon karaa ilmahaaga (waxaa kamid ah caruurta aad korsato), ilmaha ay xaaskaagu dhashay, ilmaha dawladu korsato, ama cid ay sii dhaleen kuwan wax kamid ah, sida ilmaha aad ayayda ama awowga u tahay. Ilmaha u qalma sidoo kale waxa uu noqon karaa mid aad walaalo tihiin, mid aad kala bah tihiin, ama cid ay dhaleen kuwani, sida mid aad adeer ama habaryar u tahay. Ma dalban kartid xaaskaagu ilmaha ay dhashay inuu kuu noqdo ilmo kuu qalma.

Da'da

Ilmaha u qalma waa inuu ka yar yahay 19 jir dhamaadka 2024 **ama** waa inuu kaa yar yahay (ama xaaskaaga hadii ay ku munaasab tahay). Hadii ilmaha u qalma uu yahay arday labada gelinba wax dhigta, waa inuu ka yar yahay 24 dhamaadka 2024 **ama** waa inuu kaa yar yahay adiga. Hadii ilmahaaga u qalma uu si rasmi ah oo gebi ahaanba ah u laxaad la' yahay wakhtiga 2024, wax da' ah loogama baahna.

2024 Working Families Tax Credit Application (Tilmaamaha Buuxinta Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya 2024)

Xisaabinta Da'da: Ilmaha u qalma waxaa loo arkaa kuwa gaadhay da'da maalinta ka horeysa taariikhda ay dhasheen.

Tusaale ahaan 1: Taariikhda dhalashada gabadhaadu waxaa weeye 1/2/2007. Waxaa loo arkaa inay tahay 18 markay tahay 1/1/2025. Waxa **aad** dalban kartaa gabadhaada ilme u qalme ahaan Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya maadaama oo ay ka yar tahay 19 (18 jir) dhamaadka 2024.

Tusaale ahaan 2: Taariikhda dhalashada wiilkaagu waa 12/31/2005. Waxaa loo arkaa inuu yahay 19 markay tahay 12/30/2024. Ma dalban **kartid** wiilkaaga ilme u qalme ahaan maadama oo aanu ka yarayn 19 oo aanu ahayn arday labada gelinta wax dhigto dhamaadka 2024.

Tusaale ahaan 3: Walaalkaaga 20 jirka ah, ee labada gelinba wax dhigta ee aan guursan, adiga iyo xaaskaaga idinla degan. Waxa aad tahay 18 oo xaaskaaguna waa 21 jir. Adiga iyo xaaskaagu waxa aad wada xarayseen 2024. Waxa **aad** dalban kartaa walaalka ilme u qalme ahaan Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya maadaama oo walaalka uu ka yar yahay xaaskaaga. Maadaama oo uu yahay walaalka, labada gelin wax dhigto, oo aanu xaraynin cashuur celinta, oo uu kula degan yahay, waxa uu buuxiyay shuruudaha inuu noqdo ilmahaaga u qalma.

Tusaalaha 4: Walaalkaaga 23 jirka ah, ee labada gelinba wax dhigta ee aan xaaska lahayn, ee adiga iyo xaaskaaga idinla degan. Waxa aad tahay 18 oo xaaskaaguna waa 21 jir. Adiga iyo xaaskaagu waxa aad wada xarayn doontaan 2024. Ma **dalban** kartid walaalka ilme u qalme ahaan Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya maadaama oo walaalka anuu adiga ama xaaskaaga idinka yarayn. Inkasta oo uu yahay walaalka, arday labada gelinba wax dhigta, oo uu kula degan tahay, ma dalban kartid isaga maadaama oo aanu adiga ama xaaskaaga idinka yarayn.

Tusaalaha 5: Wiil aad u adeer tahay oo 24 jir ah ayaa si rasmi ah idiinla degan. Malaha xaas oo gebi ahaanba waxa uu qabaa laxaad la'aan rasmi ah. Waxa **aad** ku dalban kartaa wiilka aad adeerka u tahay Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya maadaama oo uu gebi ahaanba oo si rasmi ah uu u laxaad la' yahay, markaa da'du maaha sharciga u qalankiisa.

2024 Working Families Tax Credit Application (Tilmaamaha Buuxinta Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya 2024)

Wada Xaraynta

Ilmaha u qalmaa waa in **aanu** la xaraynin cashuur celinta 2024 iyada oo ay xareeyeen moojee dalabka celinta cashuurta dakhliga ee laga hayo ama qiyaasta cashuurta la bixiyay.

Tusaalaha 1: Gabadha aad dhashay iyo xaaskaagu waxaa weeye 18 jir oo waxay kula degan yihiin adiga. Waxay qaadataa \$10,000 sanadkii marka la isku daro oo kuma aha waajib inay xarayso cashuur celinta dakhliga federalka. Waxay go'aansatay inayna xaraynin. Waxa **aad** dalban kartaa gabadhaada maadaama oo ay u qalanto ilme ahaan Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya maadaama oo ay ka yar tahay 19 jir, kula degan tahay, oo ayna la xaraynin daynta xaaskaaga. Ma dalban kartid xaaskaagu ilmaha ay dhashay inuu kuu noqdo ilmo kuu qalma.

Tusaalaha 2: Wiilkaaga iyo xaaskaagu waxaa weeye labaduba 18 jir oo way kula degan yihiin. Waxay qaataan ilaa \$11,000 sanadkii marka la isku daro oo may xaraynin cashuur celinta dakhliga federalka. Waxay u wada xareeyeen si wada jir ah oo waxaa loo guday cashuurta ay hayaan. Waxa **aad** dalban kartaa wiilkaaga maadaama oo uu u qalanto ilme ahaan Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya maadaama oo uu ka yar yahay 19 jir, kula degan yahay, oo kaliya uu kula xareeyay lacagta loo guday ee daynta laga hayo. Ma dalban kartid xaaskaagu ilmaha ay dhashay inuu kuu noqdo ilmo kuu qalma.

Tusaalaha 3: Ilmaha aad u ayayda tahay iyo xaaskaagu waxaa weeye 18 jir oo waxay kula degan yihiin adiga. Waxay qaataa ilaa \$10,000 oo ma uu xaraynin cashuur celinta dakhliga federalka. Waxa uu go'aansaday inuu la xareeyo dalabka Daynta Cashuurta Fursada Maraykanka. Kuma **dalban** kartid ilmaha aad ayayda u tahay maadaama oo aad wada xarayseen cashuur celinta si aad u dalbato daynta, oo aan ahayn kaliya inaad hesho lacagta lagu gudo ee cashuurta lagaa hayay.

Deganaanshaha

Ilmaha u qalma waa inuu kula degan yahay adiga wax ka badan kala badh 2024. Hadii ilmahaagu uu dhashay ama dhintay 2024, waa inuu kula deganaa waxa ka badan kala badh sanadka wakhtiga uu kula deganaa 2024.

Tusaalaha 1: Adiga iyo xaaskaaga hore waxa aad leedihiin ilmo 10 jir ah. Ilmuhu waxa uu marka hore kula noolaa adiga iyo xaaskaaga hore todobaad dhaaf maalmaha fasaxa. Maadaama oo ilmahaagu uu kula noolaa wax ka badan kala

2024 Working Families Tax Credit Application (Tilmaamaha Buuxinta Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya 2024)

badh sanadka, adiga **waxa** aad dalban kartaa ilmahaaga Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya. Xaaskaagu ma awoodo inay dalbato ilmahaaga.

Tusaalaha 2: Waxa aad usoo guurtay Washington Janaayo 1, 2024 shaqo darteed. Ilmahaagu waxa uu u yimid si uu kuula noolaado Sebteember 1, 2024. Maadaama oo ilmahaagu uu kula deganaa 4 bilood 2024 (Sebteember 1-Diseember 31, 2024), adigu **ma** dalban kartid Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya.

Tusaalaha 3: Ilmahaagu waxa uu dhintay Febraayo 28, 2024, oo waxaa la dhigay isbitaalka laga bilaabo Janaayo 15, 2024, ilaa wakhtiga uu dhintay. Waxa **aad** weli ku dalban kartaa ilmahaaga Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya ee 2024, ilaa inta aanu shakhsi kale ku dalban karin isaga. Ilmahaaga dhintay 2024 waxaa loo arkaa inuu kula deganaa adiga wax ka badan kala badh 2024 hadii gurigaagu yahay guriga uu ilmahaagu ku noolaa wax ka badan kala badh wakhtiga uu kula noolaa ilmahaagu 2024. Wakhtiga adiga ama ilmahaagu aad sida kumeel gaadhka ah ugu maqan tihiin xaalad gaar ah darteed, sida xanuun, waxaa weli loo arkaa wakhtiga ilmahaagu uu kula degananaa adiga.

Shuruucda Lagu Kala Baxo:

Ilmahaagu waxa uu u qalmi karaa Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya wax ka badan hal arji. Laakiin, ilmahaagu waxa uu kaliya dalban karaa hal ruux (oo xaaska qofka hadii ay munaasab tahay) sanadkii. Ka eeg hoos shuruucda lagu kala baxo si aad u ogaataan qofka ku dalban kara ilmaha u qalma.

- Hadii kaliya hal kamid ah dadka uu u qalmo waalidka ilmaha, ilmaha waxaa loo arkaa inuu yahay waalidka ilmaha u qalma.
- Hadii waalidku wada xareeyaan cashuur celinta si wada jirka ah oo federalka ah oo ay dalban karaan ilmaha u qalma, ilmaha waxaa loola dhaqmaa ilmo u qalma labada waalidba.
- Hadii waalidku aanay wada dalban cashuur celinta federalka laakiin labada waalid ah ku dalbadeen ilmaha cashuur celinta federalka, ilmaha waxaa loo arkaa ilmo u qalma oo waalidka ilmuhu la degan yahay ee mudo dheer sanadka. Ilmuhu waa inuu la degan yahay waalidkaas ugu yaraan 183 maalmood. Hadii ilmuhu uu la degan yahay waalid kasta wakhti isku mid ah, ilmaha waxaa loo arkaa inuu u qalmo ilmaha waalidka haysta wadarta dakhliga la habeeyay (AGI) ee sare ee sanadka.
- Hadii aanu waalidna dalban karin ilmaha ilmo u qalmo ahaan, ilmaha waxaa loo arkaa inuu yahay ilme u qalma oo buuxiyay shuruudaha dhamaan u qalanka ilmaha oo uu leeyahay AGI sanadka ee ugu sareeya.

2024 Working Families Tax Credit Application (Tilmaamaha Buuxinta Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya 2024)

- Hadii waalid uu ku dalban karo ilme u qalma ahaan laakiin waalidna aanu ku dalban ilmaha, ilmaha waxaa loo arkaa ilme u qalma oo qofkaas ah leh AGI-ga ugu sareeya ee sanadka, laakiin kaliya hadii qofka AGI uu leedahay wax AGI ka badan wixii waalidka ilmaha ee ku dalbanaya ilmaha.

Tusaalaha 1: Adiga iyo wiilkaaga 2 sano jirka ah, Jimmy waxaad la degan tihiiin hooyadaa sanadka oo dhan. Waxa aad tahay 25 jir, aan guursan, oo AGI-gaagu waa \$9,000. AGI-ga hooyadaa waa \$22,000. Jimmy waxa uu buuxiyay shuruudaha xidhiidhka, da'da, deganaanshaha, iyo wada celinta ee labadiinaba adiga iyo hooyadaa. Laakiin, kaliya mid idinka mid ah ayaa loo arkaa inuu u qalmo ilmaha inuu ku dalbato Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya. Uma qalmo ilmaha qof kale, oo waxaa kamid ah aabihii. Hadii aad doorato in aanad dalban Jimmy ilmo u qalmo ahaan Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya, hooyadaa ayaa loo arkaa inuu u yahay ilmaha u qalma ee ay ku dalbanayso Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya.

Tusaalaha 2: Adiga iyo gabadha aad edada u tahay ee 7 jirka ah, ilmaha walaashaa, ee ula degan hooyadaa si rasmi ah. Waxa aad tahay 25 jir, oo AGI-gaagu waa \$9,300. Dakhligaaga kaliya waxa aad ka heshaa shaqo gelin ah. AGI-ga hooyadaa waa \$15,000. Dakhligu kaliya waxaa uu kasoo galaa shaqadeeda. Waalidka gabadha aad habaryar u tahay waxa ay u xareynayaan si wada jir ah, waxay leeyihin AGI ka yar \$9,000 oo kulama degana adiga ama ilmahooda. Gabadha aad u edadada tahay waxay buuxisay shuruudaha xidhiidhka, da'da, deganaanshaha, iyo wada celinta ee labadiinaba adiga iyo hooyadaa. Laakiin, kaliya hooyadaa ayaa loo arkaa inay tahay ilmo u qalma inay iyadu ku dalbato. Maadaama oo AGI-ga hooyadaa uu yahay \$15,000, waxa uu ka badan yahay AGI-gaaga, \$9,300.

16. Buuxi Qaybta E ee Arjiga Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya

- Ma dalban kartid wax ka badan sadex caruur ah Lacag Soo Celinta. Tusaale ahaan, hadii aad leedahay 5 caruur ah, kaliya waa inaad keentaaa macluumaad sadex caruurta. Xadiga Lacag Soo Celinta iyo dakhliga lama kordhiyo wixii ka badan 3 caruur ah.
- Ku qor magaca kowaad ee sharciga ah ee ilmaha(caruurta) u qalanta sida uu ugu qoran yahay kaadhka sooshaal sekuuritiga ama waraaqaha ITIN. Hadii aad ku dalbanayso wax ka badan hal ilme, ku qor magaca kowaad ee ilme kasta qaybta gaar ah. Waxa aad kaliya dalban kartaa 3 caruur ah. Ha bixinin macluumaadka wax ka badan 3 caruur ah.

2024 Working Families Tax Credit Application (Tilmaamaha Buuxinta Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya 2024)

- Ku qor magaca xarafka kowaad ee magaca aabaha ee sharciga ah ee ilmaha (caruurta) u qalanta sida uu ugu qoran yahay kaadhka sooshaal sekuuritiga ama waraaqaha ITIN. Hadii aanu lahayn xarafka kowaad ee magaca aabaha, markaa isaga oo madhan kaga tag.
- Ku qor magaca awowga ee sharciga ah ee ilmaha(caruurta) u qalanta sida uu ugu qoran yahay kaadhka sooshaal sekuuritiga ama waraaqaha ITIN. Magaciisa Sharciga ee Sadexaad muhiim ma'ahn inuu kaaga la mid noqdo.
- Waxa aad sheegtaa taariikhda dhalashada ee ilmaha (caruurta) u qalanta isaga oo ah qaabka (MM/DD/YYYY). Tusaale ahaan, hadii ilmahaagu uu dhashay Maay 6, 2005, waxa aad ku qortaa taariikhda dhalashada siday 05/06/2005.
- Geli lambarka ilmahaaga ee SSN ama lambar ITIN sax ah oo dhamaystiran meesha banaan. Hadii aad u dalbanayso ITIN ilmahaaga oo aanu weli helin, waxa aad weli buuxin kartaa arjiga, laakiin waa inaad saxdaa sanduuqa Su'aasha 2.
- Dooroo sanduuqa la saxayo ee sida dhaw ugu sharaxaya xidhiidhka aad la leedahay ilmahaaga(caruurtaada) u qalmaa xidhiidhka idinka dhaxeeya.
 - Ilmaha, ilmaha aad aayada ama adeerka u tahay, ilmaha aad korsato ama dawladu koriso waxaa kamid ah waxa ay dhaleen, sida ilmaha ayayda aad u tahay.
 - Walaalaha, walaalaha kala bahdka ah, ama walaalaha waalidkood is qabaan iyo waxa ay dhaleen, sida wiil ama gabadh adeerga iyo edo loo yahay.
- Hadii ilmuhu uu kula degan yahay wax ka badan kala badh sanadka, sax sanduuqa "Haa". Hadii ilmahaagu aanu kula deganayn wax ka badan kala badh sanadka, sax sanduuqa "Maya". Hadii aad doorato "Maya," kuma dalban kartid ilmaga Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya.
- Hadii ilmahaaga(caruurtaada) uu labada gelinba wax dhiganayay 5 bilood oo kamid ahaa 2024, sax sanduuqa "Haa". Hadii ilmahaagu aanu ahayn arday 2024, sax sanduuqa "Maya". Si uu ugu qalmo ardayda, ilmahaagu waa inuu ka yar yahay 24 jir dhamaadka 2024 oo waa inuu ka yahay arday dugsiga leh shaqaale si joogto ah wax uga dhiga, duruus wax lagu barto, iyo arday joogto ah oo dugsiga ah (tusaale ahaan: dugsiga hoose, dhexe, sare, kuuliyad, ama dugsiga ganacsi); ama qaadanayo duruus tobobar beeraha ah oo labada gelin ah, oo beerta lagu qaadanayo oo lagu bixiyo dugsiga kamid ah kuwa hore loo sheegey.
 - **Tusaalaha 1:** Ilmahaagu waxa uu kula degan yahay adiga oo waxa uu dhigtaa kuuliyada bulshada labada gelinba. Aanu lahayn xaas oo aanu xaraynin cashuurta wada jirka. Waxa uu noqonayaa 23 Oktoobar.

2024 Working Families Tax Credit Application (Tilmaamaha Buuxinta Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya 2024)

Ilmahaagu waxa uu u qalmaa arday maadaama oo uu ku jiro kuuliyada bulshada labada gelinba oo uu ahaa 24 jir dhamaadka sanadka.

- **Tusaalaha 2:** Ilmahaagu waxa uu kula degan yahay adiga oo waxa uu dhigtaa kuuliyada bulshada labada gelinba. Aanu lahayn xaas oo aanu xaraynin cashuurta wada jirka. Waxa uu noqonayaa 24 Noofember. Ilmahaagu **uma** qalmo arday maadaama oo aanu ka yarayn 24 jir dhamaadka 2024.
- Hadii ilmahaagu(caruurtaada) uu qabo laxaad la'aan rasmi ah oo gebiba ah wakhti kamid ah 2024, sax sanduuqa "Haa". Hadii aanu qabin laxaad la'aan rasmi ah oo dhamaystiran, ka eeg sanduuqa "Maya". Qofka loo arko inuu laxaad la'aan rasmi ah oo dhamaystiran qabo waa hadii ay jiraan qodobada soo socdaayi:
 - Isaga ama iyadu waxay ku jirtaa hawlo aad u culus maadaama oo uu qofku qabo mushkilad jidh ama maskaxeed, **IYO**
 - Dhakhtarka xirfadle ah ayaa go'aamiyay in xaaladu jirtay ama ay jiri doono ugu yaraan hal sano ama la filanayo inay keeni karto dhimasho
- Hadii aad ku dalbatay ilmahaaga (caruurtaada) Daynta Cashuurta Dakhliga La Heley (EITC) ee cashuur celintaada federalka, waxa aad saxdaa sanduuqa "Haa". Hadii aanad dalbanin ilmahaaga (caruurtaada) EITC, sax sanduuqa "Maya".

F. Dakhliga Kusoo Galay

17. Ku qor xadiga lacagta khadka laynka 1z ee 1040 ama 1040 SR-kaaga cashuur celintaada Federalka 2024.

Tusaale ahaan " laynka 1z" ee foomka 1040:

Income Attach Form(s) W-2 here. Also attach Forms W-2G and 1099-R if tax was withheld. If you did not get a Form W-2, see instructions.	1a	Total amount from Form(s) W-2, box 1 (see instructions)	1a	
	b	Household employee wages not reported on Form(s) W-2	1b	
	c	Tip income not reported on line 1a (see instructions)	1c	
	d	Medicaid waiver payments not reported on Form(s) W-2 (see instructions)	1d	
	e	Taxable dependent care benefits from Form 2441, line 26	1e	
	f	Employer-provided adoption benefits from Form 8839, line 29	1f	
	g	Wages from Form 8919, line 6	1g	
	h	Other earned income (see instructions)	1h	
	i	Nontaxable combat pay election (see instructions)	1i	
	z	Add lines 1a through 1h	1z	

2024 Working Families Tax Credit Application (Tilmaamaha Buuxinta Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya 2024)

18. Geli Habaynta Dakhliga oo Dheeraadka ah (AGI) warbixinta laynka 11 ee 1040 ama 1040-SR ee cashuur celintaada 2024 ee Federalka.

Tusaale ahaan "laykta 11" ee foomka 1040:

8	Other income from Schedule 1, line 10	8
9	Add lines 1z, 2b, 3b, 4b, 5b, 6b, 7, and 8. This is your total income	9
10	Adjustments to income from Schedule 1, line 26	10
11	Subtract line 10 from line 9. This is your adjusted gross income	11
12	Standard deduction or itemized deductions (from Schedule A)	12
13	Qualified business income deduction from Form 8995 or Form 8995-A	13
14	Add lines 12 and 13	14
15	Subtract line 14 from line 11. If zero or less, enter -0-. This is your taxable income	15

Hadii AGI gaaga ay ka badan tahay ama u dhiganto dakhligaaga adiga kuu qoran, ee lagu sheegey Boga 1 ee tilmaamahan, **halkaas ku jooji**. Uma qalantid Lacag Soo Celinta.

19. Hadii aad shayshay ugu qortay cashuur celintaada federalka 2024, waxa aad saxdaa sanduuqa "Haa". Hadii aanay shayshay ugu qorin, sax sanduuqa "Maya", oo hadii aad ka shakido inaad shayshay ka dhigto iyo hadii kale cashuur celintaada, sax sanduuqa "Magaranayo".
- Hadii aad shayshay u qorto cashuur celintaada, waa inaad buuxisaa Schedule A (Jadwalka A) ee 1040 ama 1040-SR. Hadii aanad buuxin jadwalkan, kama dhigna **inaad** shayshay u qortay. Hadii aanad garanaynin hadii aad shayshay ka dhigtay cashuur celintaada 2024, sax sanduuqa "Magaranayo".
20. Hadii aad Saxdo sadnuuq ku xiga wax kamid ah xaaladaha hoose ay khuseeyaan 2024. Hadii wax kamid ah xaaladaha hoose ayna ku khuseynin 2024, qaybo qaybta G.

Sharaxa Xaaladaha Iman Kara

Is U Shaqaysta: Waxa aad iibisaa alaab ama leedahay ganacsi kaligaa ah ama waxaad tahay qandaraasle madax banaan; waxa aad kamid tahay iskaashato wada ganacsi ama wax iibin; ama adiga laftaada ayaa ah ganacsi (oo waxaa kamid ah ganacsi shaqeeya gelin).

Xubin karaaniga ama u shaqeysa kiniisad oo u qorshaysan tahay inay xarayso Schedule SE (Jadwal SE): Wixii adeegyada kiniisadaha ah, xubnaha kiniisadu waxaa la siiyaa Foomka W-2 laakiin ma laha haynta cashuurta sooshaal sekuuritiga ama Medicare. Waa inaad bixisaa sooshaal sekuuritiga iyo Medicare adiga oo xaraynaya [Jadwal SE \(Foomka 1040\), Cashuurta Is U Shaqaysashada](#).

2024 Working Families Tax Credit Application (Tilmaamaha Buuxinta Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya 2024)

U shaqeeya ciidamada oo qaata lacagta dagaalka: (1) waa inaad xubin ka tahay Ciidanka Qalabka Sida ee Maraykanka, iyo (2) Xaq u leedahay guno oo aad xaraysay uruurin buuxda bisha xubinta ciidanku loo dirayo aaga dagaalka ama isbitaalka loo dhigay dhaawac, xanuun, ama nabar kasoo gaadhay dagaalka aaga dagaalku ka socday ah.

Shaqaalaha sharciga ah waxay xarayn karaan Schedule C (Jadwal C) ee haynta cashuurta federalka: Shaqaalaha sharciga ah waxaa weeye qandaraasle madax banaan oo loo arki shaqaale wixii ujeedada haynta cashuurta ah. Shakhshigu waa inuu buuxiyaa shuruudaha qaar si loogu arko shaqaalaha sharciga. Shaqaalaha sharcigu waxa uu ka jari karaa kharashka la xidhiidha Jadwal C marka uu xaraynayo cashuur celinta federalka.

Tusaalaha Jadwal C

SCHEDULE C (Form 1040)		Profit or Loss From Business (Sole Proprietorship)		OMB No. 1545-0074 2021 Attachment Sequence No. 09	
Department of the Treasury Internal Revenue Service (IRS)				Go to www.irs.gov/ScheduleC for instructions and the latest information. Attach to Form 1040, 1040-SR, 1040-NR, or 1041; partnerships must generally file Form 1065.	
Name of proprietor				Social security number (SSN)	
A Principal business or profession, including product or service (see instructions)				B Enter code from instructions	
C Business name. If no separate business name, leave blank.				D Employer ID number (EIN) (see inst.)	
E Business address (including suite or room no.) City, town or post office, state, and ZIP code					
F Accounting method: (1) ☐ Cash (2) ☒ Accrual (3) ☐ Other (specify) _____					
G Did you "materially participate" in the operation of this business during 2021? If "No," see instructions for limit on losses					
H If you started or acquired this business during 2021, check here					
I Did you make any payments in 2021 that would require you to file Form(s) 1099? See instructions					
J If "Yes," did you or will you file required Form(s) 1099?					
Part I Income					
1	Gross receipts or sales. See instructions for line 1 and check the box if this income was reported to you on Form W-2 and the "Statutory employee" box on that form was checked	1			
2	Returns and allowances	2			
3	Subtract line 2 from line 1	3			
4	Cost of goods sold (from line 42)	4			
5	Gross profit. Subtract line 4 from line 3	5			
6	Other income, including federal and state gasoline or fuel tax credit or refund (see instructions)	6			
7	Gross income. Add lines 5 and 6	7			
Part II Expenses. Enter expenses for business use of your home only on line 30.					
8	Advertising	18	Office expense (see instructions)	18	
9	Car and truck expenses (see instructions)	19	Pension and profit-sharing plans	19	
10	Commissions and fees	20	Rent or lease (see instructions):	20a	
11	Contract labor (see instructions)	a	Vehicles, machinery, and equipment	20b	
12	Depletion	b	Other business property	21	
		21	Repairs and maintenance		

Leh Lacagta Ka Tanaasuliga Medicaid: Lacagaha ka tanaasuliga Medicaid waxaa weeye lacag ay bixiso dawlada federalka oo ay siiso shakhshiyaadka ku jira daryeelka mudada dheer ee guriga dhaxdiisa, ee sida kale loo dhigi lahaa isbitaalka, xarun kaaliye caafimaad, ama xarun daryeelka dhexe ah.

G. Sidee ayaad jeceshahay inaad u hesho lacag soo celinta?

Door "Ku Shubida Tooska ah" hadii aad doonayso in Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya inay kuugu dhubaan si toos ah akoonkaaga bangiga. **Xaqiiji in lambarkaaga dhabada iyo lambarka akoonkaaga ay si cad ugu qoran yihiin oo sax ah oo aad dooratid nooca akoontada bangiga habboon.**

2024 Working Families Tax Credit Application (Tilmaamaha Buuxinta Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya 2024)

YOUR NAME
678 Main Street
Anywhere, MI 12345

DATE _____

PAY TO THE ORDER OF _____ \$ _____

_____ DOLLARS

⑆999888??? ⑆00123456789 ⑆123

Routing Number Account Number Check Number

Dooro "Jeega Boosta" hadii aad doonayso in Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya in laguugu soo diro cinwaanka boosta ee aad bixisay.

Dooro "Kaadhka Kaydka ee Marka Hore Lagu Shubo" hadii aad doonayso in laguugu soo diro Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya cinwaanka boosta ee aad ku qortay.

- Kaadhka kaydka ee marka hore lagu shubo kaliya waxaa lagu soo saari doonaa magaca cida kowaad ee dalbata, iyo kaliya hal kaadh ayaa la soo saari doonaa.
- Kaadhka kaydka ee marka hore lagu shubo waxaa lagu soo diri doonaa cinwaanka boosta ee aad ku sheegtay arjigaaga.
- Marka dib loogu shubo kaadhka kaydka ee marka hore lagu shubo, DOR ma bedeli karto qaabka ay lacagta kugu siinayso. Fadlan xaqiiji in dhamaan macluumaadka aad bixisay uu sax yahay.
- Si aad wax badan uga barato macluumaad ku saabsan shuruudaha kaadhkaaga daynta iyo khidmooyinka, fadlan booqo **workingfamiliescredit.wa.gov/get-help/prepaid-debit-cards**.

Department of Revenue (Waaxda Dakhliyada) kama masuul aha lacagta la waayay hadii aad geliso macluumaad akoon khaldan ama cinwaan boosta oo khaldan. Hadii aan qaybtan la buuxin, jeega waxaa loo diri doonaa cinwaanka aad ku qortay Qaybta A. Hadii ku shubitaanka tooska ah uu diido bangigu, jeeg ayaa boosta laguugu soo diri doonaa cinwaanka aad ku sheegtay Qaybta A. Xaqiiji in cinwaankaaga boostu uu saxan yahay ee ku qoran Qaybta A (Macluumaadkaaga, boga 1).

H. Lifaagyada

Ku lifaaq nuqulka cashuur celintaada federalka (Foomka Federalka 1040 ama 1040-SR) iyo **DHAMAAN** qorshooyinka ku haboon. Foomka Federalka 1040 ama 1040 SR waxaa weeye foomka cashuur celinta dakhliga federalka ee caadiga ah ee loo isticmaalo ka warbixinta

2024 Working Families Tax Credit Application (Tilmaamaha Buuxinta Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya 2024)

dakhliga ee IRS, ka jarida cashuurta la dalbaday iyo daynta, iyo xisaabinta cashuur gudida ama kharashka cashuurta la isku dalacay ee sanadka. Hadii aad keeni kari waydo nuqul cashuur celintaada federalka, waxa aad ka dalban kartaa qoraal cashuur celin IRS oo soo koobaya macluumaadka cashuur celinta oo ay ku jiraan wadarta dakhliga. Hadii aanad ku darin cashuur celinta oo dhan, arjigaaga waa lagu diidi karaa.

Dalbo qoraal Onleyn ah:

<https://www.irs.gov/individuals/get-transcript>

Waxa aad sidoo kale dalban kartaa qoraal laguugu soo diro boosta adiga oo la hadlaya adeegyada qoraalka tooska ah ee taleefanka ee IRS ee [800-908-9946](tel:800-908-9946).

I. Bayaanka iyo saxeexa

Adiga, iyo xaaskaaga hadii ay ku munaasab tahay, waa inaad saxeexdaan arjiga si la idiin ku tix gelinyo in la idiin gudo. Marka aad saxeexdo arjiga, waxa aad si buuxda u ogolaatay dhamaan kuwa soo socda:

- Dhamaan macluumaadka aad bixisay waa run, saxan yihiin, oo way dhamaystiran yihiin.
- Waxa aad keeni kartaa waraaqo taageero ee dhamaan macluumaadka ku qoran arjiga.
- Waxa aad xaraysay cashuur celinta dakhliga 2024 laga bilaabo taariikhda aad saxeexday arjigaaga.
- Arjiga looma gudbin shakhsiga geeriyooday.
- Waxa aad siiday Gobolka Washington lacag cashuurta iibka tafaariiqda, ama cashuurta isticmaalka alaabaadka ama adeegyada la iibsaday 2024.

Sheeg taariikhda aad adiga (iyo xaaskaaga hadii ay ku munaasab tahay) saxeexday arjiga oo u qoran MM/DD/YYYY. Tusaale ahaan, hadii aad saxeexdo arjiga Febraayo 3, 2025, ku qor "02/03/2025."

J. Macluumaadka Diyaariyaha

Qaybtan waa ikhtiyaar.

21. Hadii aad buuxiso arjiga Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya ee iskaa ah, sax sanduuqa "Haa". Hadii uu qof kale kuu buuxiyo arjiga adiga, waxa aad saxdaa sanduuqa "Maya". Hadii aad saxdo "Maya," waxa aad bixisaa macluumaadka soo socda ee qofka buuxiyay kuu buuxiyay arjiga adiga:
 - a. magaca cida kuu buuxisay iyo lambarka taleefanka

2024 Working Families Tax Credit Application (Tilmaamaha Buuxinta Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya 2024)

- b. Hadii qofka kuu buuxiyay arjiga uu yahay mulkiilaha ama shaqaalaha ganacsi diyaariya cashuur celinta, waxa aad sheegtaa magaca ganacsiga iyo cinwaanka iimeelka diyaariyaha.
- c. Hadii qofka kuu diyaariyay arjiga uu leeyahay Lambarka Aqoonsiga Diyaariyaha Cashuurta (Preparer Tax Identification Number, PTIN), ku qor lambarkan meesha banaan.
- d. Hadii arjigan uu buuxiyay ruux kamid ah goob Kaalmada Cashuurta Dakhliga Wakhtigooda Ku Deeqday (Voluntary Income Tax Assistance, VITA), sax sanduuqa "Haa" oo waxa aad ku qortaa magaca goobta hoos. Hadii arjigan aan lagu buuxin goobta VITA, sax sanduuqa "Maya".

K. Macluumaadka Deegaanka

Macluumaadka deegaanka waa ikhtiyaar, laakiin waxay ka caawinayaan xeer dejinta gobolka qiimaynta wax ku oolnimada barnaamijka Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya.

- 22. Hadii adiga, xaaskaaga, ama ilmahaaga (caruurtaada) ay yihiin Hisbaanig, Latino, ama Isbaanish sax dhamaan sanduuqyada khuseeya. Hadii adiga, xaaskaaga, ama ilmahaagu (caruurtaada) ay yihiin Hisbaanig, Latino ama Isbaanish kale guji "Sharaxa" oo waxa aad ku qortaa meesha banaan. Hadii adiga, xaaskaaga, ama ilmahaagu (caruurtaada) aynaad doonaynin inaad sheegtaan, sax sanduuqa "Ma doonayo in aan sheego" dhamaan shakhsiyaadka ay khuseyso.
- 23. Doorro dhamaan qoomiyada adiga, xaaskaaga, ama ilmahaaga (caruurtaada) ku haboon. Hadii aad doorato Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska sax "Qabiilka" oo ku qor magaca Qabiilka meesha banaan ee lagu siiyay. Hadii adiga, xaaskaaga, ama ilmahaagu (caruurtaada) aynaad doonaynin inaad sheegtaan, sax sanduuqa "Ma doonayo in aan sheego" dhamaan shakhsiyaadka ay khuseyso.
- 24. Doorro sida aad u maqashay barnaamijka Lacag Soo Celinta Cashuurta Qoysaska Shaqeeya. Sax "Websaytka," "Baraha Bulshada," "Hay'ad ama Urur Kale," "Cid Ayaa Kuu Sheegey," ama "Waxkale."